

Deeqaha Waxbarashada

TheWashboard.org

TheWashboard.org (<https://thewashboard.org>) waa webseed deeqda waxbarashada kuleejka oo bilaash ah. Ishaan tayada saraysa ee lagu kalsoon hayah ayaa ku xiraysa ardayda adeeg bixiyaasha deeqda waxbarashada ee Gobalka Washington.

- Waxay fududaynasa hanaanka codsiga deeqda waxbarashada ee ardayda.
- Xogta gaarka ah ee ardayda waxaa lagu hayaa qaab sir ah.
- Liisaska deeqaha waxbarashada ayaa kala duwan waxayna taageeraan dookhyada kaladuwaa ee ardayda iyo guulahooda.
- Sulus kamid ah deeqaha waxbarashada ee lasoo dhajiyoo ayaa qasab ka dhigaaya GPA dhan 3.0 ama ka badan.
- Deeqo badan ayaa la cusboonaysiin karaa, taasoo ka dhigan inaad u qalmi karto maal gelinta deeq waxbarasho oo joogto ah.

Talaabooyinka xigga

- Arag abaal marintaada deeqda dhaqaalaha oo xaqiji inaad fahanto.
- Haddii aad ka fakarayo racfaan, la xariir xafiiskaaga deeqda dhaqaalaha si aad u waydiiso sida aad racfaan uga qaadanayso.
- Akhri waraaqdaada abaal marintii ugu danbaysay iyo webseedka dugsiga ama barnaamijka si aad u aragto inay jirana iyo inkale ee aad u baahan tahay si aad u codsato deeqda.
- Indhaindhe abaal marintaada deeqda dhaqaalaha oo xaqiji inaad fahanto. Ardayda ayaa badanuu su'aalo ka qaba isbadallada lagu sameeyo qarashkooda dugsiga, waxaana jira qarashaad badan o la iska dhaafii karo aana qasab ahayn inaad dhiibto.
- Buuxi cadaynta deeqda dhaqaalaha, ayna ku jiraan lacagaha daynta ah.
- Kala hadal la taliyaagaaga sida aad u dhiibayso baaqiga ku haray abaal marintaada deeqda waxbarashada.
- Samayo miisaaniyada kuleejka, oo ay ku jiraan lacagaha gaadiidka, cuntada, iyo qarashka kale.

Baraha Raadinta iyo Kaydadka ee Deeqaha Waxbarashada

- ✓ <https://gearup.wa.gov/educators/scholarships>
- ✓ <http://getschooled.com/journey/get-to-college/scholarships-for-college>
- ✓ <https://www.scholarshipjunkies.org>
- ✓ <http://bigfuture.collegeboard.org/scholarship-search>
- ✓ www.unigo.com
- ✓ <https://scholarships360.org/>
- ✓ <https://www.fastweb.com/>
- ✓ www.scholarships.com



Sida loo sii Wado biixinta Qarashka Iskuulka

- Waxaa u baahan tahay inaad markale codsato deeqda dhaqaalaha iyo sanad kasta ood ku jirto waxbarashada ama tababarka kadib dugsiga sare.
- Buuxi foomamka FAFSA ama WASFA xili hore kadib Oktoobar 1 sida ugu macquulsan sanad dugsigeedka soo socdo.
- Codsiya FAFSA, adigga iyo waalidiintaada ayaa adeegsan doona isla aqoonisyada FSA (Flexible spending account, cadadka kala duwan ee la isticmaalaayo) ee aad samaysatay intii lagu jiray sanadkaagi ugu danbeeyay ee dugsiga sare. Sii waalidiinta waqtii ku filan si ay ku buuxshaan qaybtooda.
- Ka codso Ka codso xafiiskaaga caawimaada dhaqaalaha inuu kaa caawiyo codsiga FAFSA ama WAFSA ama si aad u aragto haddii ay qabanayaan munaasabada Ololaha Sanadka 12aad.
- Raadi taariikhda muhiimada dugsigaaga ee caawimaada dhaqaalaha. Xaqiji in dhammaan dukumiintigaaga aad buuxiso waqtiga kahor si aad ugu qalanto deeqda ugu badan ee macquulka ah.
- Raadi deeqaha waxbarashada ee dhammaan sanadka oo dhan sanad kasta ood ku jirto dugsiga sare. Raadi haddii dugsigaagu baxsho deeqda waxbarashada haayada ama xarunta. Haysato sifii markasta aad cusboonaysiisay si uu kaaga caawiyo codsiyada deeqda waxbarashada iyo waraaqaha talo bixinta.
- Ma laguu xushay xaqijiinta FAFSA? Keen dukumiintiga codsigaaga kaa codsanaayo xiliga uu dugsigaagu kuu cayimay.
- Ma waajahaysaa caqabad dhaqaale oo degdeg ah? Waydii dugsiga haddii ay baxshaan dayn degdeg ah ama deeq degdeg ah.



Ilaha

Qorshayso Mustaqbalkaaga

Ardayda dugsiga sare ayaa baran kara xirfadaha, iyo hanaanka diiwaan gelinta xogna ka helaaya caawimaada dhaqaalaha. Booqo <https://wsac.wa.gov/actionplan>

Fahanka Daymaha Ardayda

Hel khayraadka iyo agabka la xariira daymaha ardayda. Booqo <https://studentloaned.wa.gov/>

Fahanka Shuruudaha iyo Lingo

Baro waxa looga jeedo kuwaan. Liiskaan Aqoonta Kuleejka ayaa lagu heli karaa Af Ingiriis, Ruush, Soomaali, Isbaanish, iyo Fiyeednaamiis ah. Booqo <http://www.wcan.org/college-knowledge>

La xariir Otterbot

Otterbot waa adeegga fariin qoraalka bilaashka ah si uu uga caawiyo ardayda Washington inaybadeegsadaan deeqda dhaqaalaha iyo waxbarashada kuleejka iyo shaqada. Ardayda ayaa adeegsan kara Otterbot ayagog isticmaalaaya fariin qoraalka 24 saac maalintii, todobo maal mood asbuucii. Fariin qoraal ugu dir jumlada "Hi Otter" lambarka 360-928-7281. Xog badan ka ogoow <https://wsac.wa.gov/otterbot>

www.gearup.wa.gov

Xogta ku qoran daabacaadaan ayaa lagu diyaarshay deeq laga helay U.S. Department of Education (Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka). Hase yeeshii, xogtu qasab maaha inay wakiil ka tahay xeerka Waaxda Waxbarashada, waana inaadan u qaadan inay tahay dhiiri gelin ka timid Dawlada Federaalka ah.



Caawimaada Dhaqaalaha 201

Sida lagu helo Mal gelinta Waxbarashada Dugsiga Sare Kadib

Waan codsaday. Maxaa xigga?

Codshada diiwaan gelinta iyo deeqda dhaqaalaha (adoo adeegsanaaya FAFSA (Free Application for Federal Student Aid, Codsga Bilaashka ah ee Caafimaadka rdayda ee Federaalka ah) ama WASFA (Washington Application for State Financial Aid, Codsga Washington ee Deeqda Dhaqaalaha Ardayda ee Gobalka) ayaa ah talaabooinka koobaad ee safarkaaga ka qaybgalka waxbarashada ama tababaraka dugsiga sare kadib. Waxay qaadan kartaa dhawr bilood kahor intaadan ogaan haddii aad aqbashay iyo inkale iyo nooca deeqda dhaqaalaha ee aad heli karto.

Xataa kadib marka lagaa aqbalo kuleejka, waxaa jira wali shaqo badan si aad u gaarto go'aankaaga ugu danbeeya dadna u diyaar garoowdo. Waaad u baahan doontaa inaad ka fakarto nooca deeqda waxbarashada ee aad ka heli karto kuleejka aad codsanayso, waxaaadna u baahan kartaa inaad go'aansato haddii aad doonayso inaad ku noolaato gudaha dhismaha kuleejka ama aad gaadiid usoo raacayo.

Xaaladahaaga Dhaqaale Miyay Isbadaleen?

Waxaa laga yaabaa inaad waajahayso isbadal ku dhacay dakhligaaga ku qoran waa lagusoo sheegay codsiga deeqda dhaqaalaha ama cadadka ku qornaa canshurahaaga sanadkii lasoo dhaafay.

Waaad u baahan doontaa inaad la xariito waaxda deeqda dhaqaalaha ee kuleejyada aad codsatay.

SwiftStudent waa aadal bilaash ah oo ka caawisa ardayda inay fahmaan racfaannada waxaynaa ku siinaynaa tusmooyinka qorsita waraaqda racfaanka deeqda dhaqaalaha. Acladaan lama wadaagto xogta isticmaalaha qolyo sadexaad.



Ma laguu xushay xaqijinta?

Istadii. In lagu xusho kama dhigna inaad samysan wax khaldan.

Xaqijintu waa hanaan dugsigaagu u adeegsado xaqijinta in xogta aad ku sheegtay foomka FAFSA ay sax tahay. Dadka qaar ayaa lagu doortaa si qori tuur ah, dugsiyada qaar ayaana xaqijiyi dhammaan foomamka FAFSA ee ardayda.

Talaabada xigt, jawaab bixi. Ha iska indho tirin codsigaan. Waa lagaa rabo waa keliya inaad keento dukumiintiga dugsigaaga kaa codsado-aadna xaqijiso inaad samayso arintaan waqtiga dugsigu kuu cayimay, ama ma awoodi doontid inaad hesho deeqda dhaqaalaha.

Isha
Fahanka Xaqijinta (Muuqaal)
<https://www.youtube.com/user/WSACouncil/videos>

Fahan Waraaqahaaga Abaal Marinta



Waraaqda aqbalaada ee kuleej kasta ayaa kaduwani kuwa kale. Kadib markaad gudbiso Codsi Bilaash ah ee Gargaarka Ardayda ee Federaalka (CBGA), Codsga Bilaashka ah ee Deeqda Ardayda ee Federaalka) ama Codsga Washington ee Gargaarka Maaliyadeed ee Gobalka (WASFA), waxaad heli doontaa waraaqda aqbalaada deeqda dhaqaalaha oo aad ka helayo dugsi kasta oo ku aqbala. Waraaq kasta waxay soo koobaysaa qarashka diiwaan gelinta buuxda ee halka sano ah iyo xirmadaada deeqda dhaqaalaha. ka fiiri waraaqaha shaqada ee aqbalaada si aad isku babac dhigto qarashkaaga, caawimaada aad helayo iyo khayraadka dhiibista qarashka barta <https://gearup.wa.gov/students-families>

WAXYAABABA AAD KA FIIRSANAYO MARKA AAD ISKU BABAC DHIGAYSO WARAAQHA AQBALAADA

Go'aanso wadarta guud ee qarashaadka dhabta ah. Xasusnoow, qarashaadka dadban maaha kuwo uu bixinaayo kuleejku. Markaad ka fakarayso noocyada qarashaadka aad u baahan tahay in lagaa dhiibbo ku dar qarashaadka tooska ah iyo qarashaadka dadban ee aad u baahan tahay. Su'alaha aad ka fiirsanayo.

- Gaadiid ma u raaci doontaa ama ma u safri doontaa sii socd iyo soo socd ba xarunta kuleejka marar badan? Cadad intee le'eg ayaad qiyasaysaa inaad u baahan doonto sanad dugsiyeedka?
- Ma iibsan kartaa buugta ama agabka celiska ah? Ma kasoo caariyasan kartaa maktabada? Barnaamijkaaga digriigu ma u baahan yahay buugaagta akhriska ama agab badan? Ka codso xafiiska diiwaan gelinta xog deheraad ah haddii aad u baahato.
- Waa maxay noocyada qarashaadka gaarka ah ee aad filayso inaad lahaato sanadka?

Deeqdaadu ma mid lasoo cusboonaysiin karaa (oo macnaheedu yahay in aad adeegsan karto wax ka badan hal sano)? Deeqaha waxbarashada qaarkood ayaa u baahan inaad joogtayo GPA (Grade Point Average, Celceliska Buundada Imtaxaanka) gaar ah si laguugu cusboonaysiyo. Deeqaha qaar ayaa u baahan inaad buuxiso shuruudo dakhli sanad kasta. Waydi xafiiska deeqda dhaqaalaha haddii deeqgo waxbarasho oo gaar ah, hadiyad, iwm. aysan cadayn in lasoo cusboonaysiinaayo iyo inkale.

Ma tahay arday ku jira Damaanada Kuleejka? Xasusnoow, College Bound Scholarship waa barnaamij xili hore loo go'o oo deeqda dhaqaalaha ee gobalka siyya ardayda u qalanta kaasoo daboola sadex qarash oo gaar ah: lacagta kuleejka oo qiimaha kuleejyada dawlada ah, qarashaadka qaar, iyo gunnada yar ee buugaagta. Cadadka gaar ah ayaa laga bixin doonaa xarun kasta iyo arday kasta, laakiin qarashaadka kor ku qoran waxaa dabooli doona barnaamijyada deeqda dhaqaalaha ee gobalka, sida Washington College Grant. Waa qasab inaad buuxisaa shuruudaha u qalmida dakhliga marka aad codsanayso caawimaad dhaqaale. Arintaan waxaa go'aamin doona xafiiska deeqda dhaqaalaha marka aad codsanayso FAFSA ama WASFA. Waaad sidoo kale u baahan doontaa inaad buuxiso Balanta Gudigga Kuleejka.

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo fahanka waraaqdaada aqbalaada? Kala xariir xafiiska deeqda dhaqaalaha ama diiwaan gelinta ee kuleejka wixii su'aalo ah ood qabto!



Hel Caawimaad

Booqo <https://wsac.wa.gov/12th-year-campaign> si aad u hesho munaasabad aadna u hesho caawimaad qarsoodi ah oo lagaa siyyo buuxinta foomamka codsiga WASFA iyo FAFSA.

Fahanka Abaal Marintaada (Muuqaal)
<https://www.youtube.com/user/WSACouncil/videos>

Waa kee Deeqda Dhaqaalaha ee ugu Fiican inaad Aqbasho?

- Marka xafiiska dugsigaagu kuusoo diro yabooh deeq, waxaa lagaa codsan doonaa inaad doorata deeqda dhaqaalaha ee aad doonayso.
- Si taxadar leh u eeg dookhyada oo gaar go'aankaaga faahfaahsan.
- Haddii lagu siyyo dookhyada deeqda dhaqaalaha, xeerka ayaa ah: lacag bilaash ah marka koobaad (deeqaha iyo hadiyadaha), kadibna lacagta aad shaqaysatay (waxbarashada shaqada), kadibna lacagta daynta ah (daymaha ardayda ee federaalka).

QAABKA AAD U AQBALAYSO

DEEQAHADHADA YO HADIYADAHAD (Tusaale, deeqda Pell ama College Bound Scholarship)

Qasab maaha inaad celiso lacagta marba haddii aad buuxiso heerka hormarka tacliinta. Xaqiji inaad fahmayso shuruudaha qasabka ay tahay inaad buuxiso si aad usii hesho deeqdaan (sida GPA ga).

BARASHADA SHAQADA

Qasab maaha inaad celiso lacagta marba haddii aad buuxiso heerka hormarka tacliinta. Waa qasab inaad lacagta shaqaysato, marka xaqiji inaad isku dheeli tirta shaqada iyo casharada.

DAYMAHA ARDAYDA EE FEDERAALKA

Waa qasab inaad lacagta dib u bixiso adoo raacinaaya dulsarta. Nooca daynta ee ugu fiican inaad marka koobaad aqbasho waa:

1. Daynta Kaabida leh
2. Dayn bilaa kaabid ah
3. Daynta Parent Plus

DAYMAHA GOBALKA AMA KULEEJKA

Waa qasab inaad lacagta dib u bixiso adoo raacinaaya dulsarta. Shuruudaha daynta ayaa laga yaabaa inaysan u ficiinay sida daynta federaalka. Xaqiji inaad akhrido shuruudaha aadna isku barbar dhigto marka aad go'aansanayso.

DAYMAHA GAARKA AH

Waa qasab inaad lacagta dib u bixiso adoo raacinaaya dulsarta. Shuruudaha daynta ayaa caadiyan ka liita kuwa deyni federaalka. Daymahaan laguma dhafi karo daymaha federaalka marka dib loo bixinaayo. Arintaan ayana adkayn karta qorshahaaga deyn bixinta.